



ARRIMAHA KU SAABSAN)

Ku-sii-deynta shuruudeed ee _____)

Lambarka JRA _____)

Taariikh Dhalasho _____)

**AMARKA KU-SII-DEYNTA SHURUUDAHA
ORDER OF PAROLE CONDITIONS**

Ku-sii-deynta shuruudeed waa muddo kormeer ah oo ka dambeysa ka-siideynta goobta ku-noolaansho ee qofka lagu hayay. ShuruudO qaarkood iyo/ama xaddidaad ayaa lagu soo rogi doonaa dhaqdhaqaaqa iyo waxqabadyadaada gudaha beesha shuruud AHAANlaguugu sii daayay. Muddada aad ku jirto ku-sii-deynta shuruudda, adiga waxa lagaa rabaa inaad u hoggaansanto xaaladaha soo socda:

1. Inaad qaadato adeegyada la heli karo ee caafimaadka, caafimaafka maskaxda, duroogada/khamiriga, dambi galmo, caafimaadka dhimirka, iyo adeegyada kale ee dembiyada-la-xiriira kolba sida loo go'aamiyay:
2. Inaad u warbixiso kolba sida u kuu tilmaamay sarkaalka sii-deynta shuruudda ee adiga lagu magacaabay iyo/ama qofka hagaajiyay kolba sida loo go'aamiyay (**Sii-deynta Shuruudda Adag: aan ka yaran usbuuc kasta**):
3. Inaad iska ilaaliso la xiriirka shaqsiyaadka iyo/ama koox shaqsiyaadka qaarkood sida la go'aamiyay:
4. Inaad ku kacdo koorso waxbarasho, tababaritaan mihnadeed, ama shaqo sida la go'aamiyay:
5. Inaad isku dhiibto kormeeritaanka elektiroonigga ah sida la go'aamiyay
6. Inaad ka shaqeyso adeegga beesha sida la go'aamiyay:
7. Inaad sii joogto xuduudka goobaha lagu gartay sida la go'aamiyay:
8. Inaad joogto cinwaan gaar ah muddada saacadood ee la go'aamiyay:
9. Inaad u wargaliso sarkaalka ku-sii-deyntaada shuruudda cinwaanka hadda aad ku jirto ama wixii cinwaan ee aad beddelato.
10. Inaad bixiso ganaaxyada iyo/ama magdhowga ay maxkamadi amartay.
11. Inaad iska ilaaliso isticmaalka duroogada iyo khamriga oo aad oggolaato baaritaanka kaadida lama-filaanka ah.
12. Inaad iska ilaaliso hasashada qalabyada xabbadu ka dhacdo ama hubka dilaaga ah.
13. Inaad iska ilaaliso galitaanka dambiyo cusub.
14. Inaad u hoggaansanto shuruudaha soo socda ee dheeraadka ah ee u garto inay habboon tahay sarkaalka ku-sii-deyntaada shuruudda:
15. **Inaad addeecdo dhammaan sharciyada oo aad iska ilaaliso wixii anshax ee halista ku ah badbaadad shacabka (loogu talagalay kaliya Sii-deynta Shuruudda Adag leh).**
16. **Inaad ka soo baxdo dhammaan shuruudaha la xiriira barnaamijka kormeerkaaga adag oo ay ku jiraan (loogu talagalay kaliya Sii-deynta Shuruudda Adag leh):**

Wixii iska beddela xaaladah kusii-deynta shuruudda ayaa u baahn doona shir ka dhexeeya adiga iyo sarkaalka sii-deynta shuruudda adiga laguugu talagalay.

FIIRO GAAR AH: Qodobbada 12 iyo 13 lama beddeli karo.

KELMADAHA QOFKA SHURUUDA LAGU SII-DAAYAY: Waxaan wada eegnay aniga iyo sarkaalkayga sii-deynta shuruudda ah xaaladaha korka ku yaal oo waan fahamay. Anigu waxaan fahamsanahay in ku xadgudubka midkoodna xaaladaha korka ku yaal aya ku damabyn doonaan ganaax ama ganaaxyo lagu oggol yahay hoosta sharciga RCW 13.40.210. Waxa kale oon aan fahamsanahay in ku xadgudubyo kasta oo sharci ay ku dambayn doonaan ku soo celinteyda maxkamad.

Saxeexa Qofka Shuruudda Lagu Sii-Daayay: _____ Taariikh:

Saxiixa Waalid/Mas'uul, Markhaatiga _____ Taariikh:

Saxeexa Sarkaalka Ku-Sii-Deynta shuruudda _____ Taariikh:

Shuruudaha qofka shuruudda lagu sii-daayay ee dokumentigani ayay dhidibtay awoodda maamulka dhaqancelinta dhallinyarta iyada hoos imaneyna xeerarka RCW 13.40.210 and 13.40.320(8).